



Codso daryeel caafimaad:

- adigoo galaya barta internetka Benefits.Ohio.Gov,
- taleefan udir (800) 324-8680, ama
- si shaqsi ah ugutag Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska.

Ka firi xafiiska deegaanka adoo galaaya bogga JFS.Ohio.Gov/County.

Wac Laynka Macaamiisha ee Tooska ah ee Medicaid oo ah (800) 324-8680 si lagaaga caawiyo buuxinta codsiga ama su'aalaha kale ee aad qabto.

Macluumaad dheeri ah waxaad kahelaysaa bogga Medicaid.Ohio.Gov.



Adeegyada La Dhaafayo

Qaar kamid ah adeegyada la dhaafayo ee Medicaid ayaa u fasaxaya dadka naafada iyo kuwa qaba xanuunada halista ah inay helaan daryeelka ayagoo guryahooda iyo bulshadadooda dhex jooga, halkii ay ka joogi lahaayeen xarumaha muddada dheer ee daryeelka, isbitaalada ama xarumaha daryeelka ee heerka dhexe. Adeegyadaan waxay sidoo kale u sahlayaan dadka inay maamul xoogan kuyeestaan daryeelkooda ayna bulshadooda saamayn kudhex lahaadaan.

Adeegyada soosocda ayaa gacan kagaysta kahortagga ama dib udhigidda in qofka xarun caafimaad ladhigo ama dhiirigaliya madaxbanaanida qofka. Tusaalayaasha adeegyadan waxa kamid ah, laakiin aan ku ekayn, xannaanaynta, daryeelka qof ahaaneed, cuntooyinka guriga la keeno iyo badalaadaha guriga.

- Dhaafista Daryeelka Guriga Ohio ee dadka da'doodu tahay 59 jir ama ka yar
- Dhaafista BAASAABOORKA ee dadka da'doodu tahay 60 jir iyo ka wayn
- Dhaafista Maceeshadda la Kaalmeeyey (Assisted Living Waiver) ee dadka da'doodu tahay 21 jir ama ka wayn
- Dhaafista MyCare ee dadka da'doodu tahay 18 jir ama ka wayn kuwasi oo hela Medicaid iyo Medicare labadaba

Dhaafista MyCare waa mid ku xaddidan dadka deggan degmooyinka soosocda:

Butler	Delaware	Lake	Montgomery	Trumbull
Clark	Franklin	Lorain	Ottawa	Union
Clermont	Fulton	Lucas	Pickaway	Warren
Clinton	Geauga	Madison	Portage	Wayne
Columbiana	Green	Mahoning	Stark	Wood
Cuyahoga	Hamilton	Medina	Summit	

Macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan dhaafisyada Medicaid:

- la xidhiidh Waaxda Degmadaada ee Adeegyada iyo Qoyska,
- booqo barta internetka ee Medicaid.Ohio.Gov/HCBSWaivers, ama
- wac khadka tooska ah ee Macmiilka ee Medicaid oo ah (800) 324-8680.